Ururka Sokeain lasten tuki ry waxaa uu sannadihii 2000 oo dhan xoogga saaraayay in uu qabanqaabiyo fasaxyo loogu talaggalay carruurta aragga naafada ka ah iyo qoysaskooda. Howlaha uu ururku qabanqaabinaayo waa kuwo lacag la'aan ama bilaaash u ah ka qaybqaatayaasha. Fasaxyada gaagaaban waxaa carruurta la siinayaa daryeel buuxa, fasaxyada dhaadheerna waxaa la siinayaa daryeel bar ah ama aan dhammaystirnayn. Qoysku iyaga ayaa ka mas'uul ah oo iska bixinaaaya, wixii kharash ah ee ka dhasha isticmaalka gaarigooda u khaaska ah inta fasaxa lagu guda jiro.



Qoysku waxaa ay fasaxa ka helayaan waaya-aragnimo ama khibrado cusub, iyagoo wakhtiga ku qaadanaaya dabeecadda. Waxaa haatan la heli karaa fasaxyo muddadoodu kala dheer tahay oo la aadaayo guryaha xagaa baxa (mökkiloma), isboortiga iyo dabeecadda. Hawlaha fasaxyada waa kuwo la qabanqaabiyo sannadka oo dhan. Fasaxyada ururka waxaa ka qaybqaadan kara ugu badanaan laba qoys, marka la qorshaynaayo hawlaha fasaxa waxaa tixgelinta la siinayaa waxyaabaha uu qoysku doonaayo. Haddii loo baahdo waxaa fasaxa jooga oo la helayaa qof hage/ ama caawiye ah, iyo sidoo kale qalab qofka u sahlaayaa inuu ku dhex socdo dabeecadda. Sidoo kale wuxuu ururku suuraggaliyaa in qoyska dhexdiisa ay fasax ku aadaan guryaha xagaa baxa (mökkiloma). Arrinkaan ah fasaxa lagu tagaayo guryaha xagaa baxa, qoysku iyaga ayaa ka mas'uul ah cunto soo iibsashada iyo karinteedaba.

Ururku wuxuu sidoo kale qabanqaabinayaa munaasabado ay dadku si wadajir ah u samaynayaan. Macluumaadka muhiimka ah ee arrinkaas ku saabsan waxaa laga helayaa kalandarka ama jadwalka munaasabadaha. Munaasabadahaas waxaad ku baran kartaa hiwaayado cusub, ama waxaad ku tijaabin kartaa ku socodka qalabka caawinta, ama adiga oo la socda hagaha ayaad soo fiirfiirin kartaa dabeecadda.

Fasaxyada waxaa loogu talaggalay dadka aragga naafada ka ah iyo qoysaska dhalay carruurta aragga naafada ka ah, kuwaasoo carruurtooda aragga naafada ka ah ay da'doodu ka hoosayso 16 sano jir, waxaana ay qoysku ka faa'iidaysanayaan fasaxaas iyaga loogu talaggalay. Fasaxyada waxaa laga codsan karaa linkigaan soo socda, iyadoo la buuxinaayo foomka loogu talaggalay fasaxyada qoysaska: [täyttämällä hakemus perhelomalle.] Faahfaahinta dheeraadka ah ee arrinkaan ku saabsan waxaa laga heli karaa iskudduwaha ururka, adigoo iimayl ku soo diraaya cinwaanka ah: info (at) sokeainlastentuki.com, ama waxaad si toos ah u soo wici kartaa telefoonka gacanta ee iskudduwaha Maarit Törmikoski-Hampf 045 261 9400.